STANDARD™ REUNIFICATION METHOD



Reunification Information (PLEASE PRINT CLEARLY)
Have photo identification out and ready to show school district personnel.

Student Name .....

Student Grade ..... Student Cell Phone Number .....

Name of person picking up student .....

Signature .....

Phone number of person picking up student .....

Relationship to student being picked up .....
Photo identification matches name of person picking up student? Y or N

Parent completes:
Print Student Name Again .....
Student Grade .....
Student Birthday .....

School personnel completes upon release of student
TIME INITIALS OTHER

DIB-U- MIDEYNTA WAALIDKA IYO ARDAYGA

Waxaa laga yaabaa in dugsiga ardaydaada ka dhacdo marxalad waalidka ku kalifta in uu ilmihiisa kasoo qaato iskuulka, iyadoo la isticmaalayo qaab farsameysan. Qaabkani waxaa loogu yeeraa dib-u-mideynta waxaana suura gal ah in ay dhacdo xaaladan oo kale mar ay cimiladu xuntahay, korontada tagto ama uu dab ama sun ka dilaacdo dugsiga. Qaabka caadiga ah ee dib-u- mideynta waa nidaam dejisan oo loogu talagalay in lagu dhaqmo marka ay timaado xaalad Qatar ah oo laga yaabo in ay dhacdo maalin dugsiyeeka.

Maadaama qaabka dib-u-mideynta aysan mac-neheedo aheyn in maalinta iskuulka dhamaaday, waxayna dib-u-middeynta ka dhici kartaa goob aan ahayn halka uu ardayga iskuulka ka dhigto. Goobtani hadii ay tahay goob kaloo iskuul ah, sidoo kale waxaa jira qaab ama nidaam xakameysan oo loo siidaanayo ardayda.

WARGELINTA/OGEYSIINTA

Waalidiinta waxaa loo wargelin doona siyaabo ama qaabab badan. Dugsiyada degmada waxay fariimaha kuugu soo gud-binayaan nidaamka baahinta fariimaha mid qoraal iyo dhageysi ah. Mararka qaar waxaa suuragal ah in ardayga laga codsado in uu fariin qoraal ah u diro waaliidiintiisa. Fariinta qoraalka ee dib-umideynta ee laga yaabo in ay kaaga timaado ardayda waxaa laga yaabaa in ay u ekaato sidan: Iskuulka waa laxiray, fadlan kaalay oo iga soo qaad dugsiga 3:25 irida weyn ee laga soo galo iskuulka. Soo qaado kaarka aqoonsigaaga-IDgaaga "

WAXYAABAHA LAGA FILAAYO WAALIDKA/ MAS'UULKA

Hadii waalid ama mas'uul lagu soo wargeliyo in loo baahanyahay in lasameeyo dib-u-mideyn, waxaa jira waxyaabo looga baahanyahay in waalidka ama mas'uulka uu ogaado. Marka hore, waa in aad la timaadaa wax laguugu aqoonsado sida ID-ga. Taasi waxay noo fududeyneysaa kala soocida xiliga lagu gudo jiro dib-u-middeynta. Marka labaad, waa in aad dulqaad yeelata, maxa yeelay dib-u-middeynta waa qaab lagu ilaalinayo amaanada ardayga, waxa waliba mas'uuliyadeeda qaadaya dugsiga si uu u mideeyo ardayga iyo waalidka ama cida ardayga mas'uulka ka ah.

MAXAA DHACAYA HADII UU WAALIDKA ILMOHOODA SOO QAADAN WAAYO?

Hadii ay waalidka qaadan kari waayo ilmohooda waqyiga dib-u-mideynta, ilmahaasi waxaa loo ogolaanayaa in ay raacaan cida ugu qoran emergency ama in lawaco marka ay dhacdo xaaladaha deg dega ah. Hadii kale, ilmaha iskuulka baa haynaya ilaa waalidka uu ka soo qaato.

MAXAA DHACAYA HADII ARDAYGA DUGSIGA GAARI LAYIMID AMA KU IMAADAY?

Waxaa dhici karta in mararka qaar ardayga loo diido in ay baakinka kala baxaan gaariga. Markaas oo kale waxaa waalidka lagu wargelinayaa inuu u imaado ardayda. Mararka qaarna ardayda dugsiga sare kaligood ayaa la siideyn karaa iyaga oo aan cidna wehelinin.

i love u guys FOUNDATION

© Copyright 2011-2020, All rights reserved. The "I Love U Guys" Foundation. Conifer, CO 80433. The Standard Reunification Method and I Love U Guys are Trademarks of The "I Love U Guys" Foundation and may registered in certain jurisdictions. This material may be duplicated for distribution by recognized schools, districts, departments and agencies.

SIDEE U SHAQAYN DOONTA HABRAACAN?
Ardayda waxaa laga codsanayaa in ay si nidaamsan oon buuqlahayn u sugaan waalidka. Ardayda waxaa Suuragal ah in laga codsado in ay waalidiintood ama wixii mas'uul ka ah u diraan fariin qoraaleed. Ardayda looma ogolaan doono in ay fariimo qoraaleed kale ka diraan iskuulka gudihiisa ama banaanka ama goobta dib- u-mideynta. Waxaa haboon in aan iska yareyno isticmaalka intarnetka inta aan ku guda jirno dib-u-midenyta.

KAARARKA DIB-U-MIDDEYNTA
Waalidiinta waxaa idiin jira dhowr tillaabo. Hadii uu waalidka iskuulka uu gaari u soo ka xeysanayo, waxaa lagula talinayaa in uu ka foojignaadaa baaxada gawaarida taraafikada iyo waliba gawaarida deg deg san. Waalidiinta waa in ay gawaarida dhigtaan meelaha loo asteeyay, waana in aysan isaga tagin. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa in ay aadaan goobta lagu mideynayo ilmahooda" marka hore waa in aad iska soo xaadiriyaan goobta ayna layn soo galaan iyaga oo leenka kagalaya halka kuqoran xarafka hore iyo kan dambe ee magaca ilmahooda uu ka bilawdo. Inta ay leenka ku jiraan waalidiinta waxaa laga codsanayaa in ay buuxiyaan kaarka dib-umideynta. Kaarkani waxaa loo samaynayaa astaan waana lakala jarayaa xiliga dib-u-mideynta. Macluumaadka labada dhinac kor iyo hoos uga qoran kaarka lakala bixinayo waa isku mid. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa in ay buuxiyaan dhamaan qaybaha kaarka.

Hadii ay dhacdo in aad ilmo badan leedahay oo aad doonaysid in aad isku mar dib-u-mideyso, arday waliba waxaa lagaaga baahanyahay in aad kaar u buuxisid.

Marka laga hadlayo qaadashada arday badan oo dib loogu mideeyo qoyska, kaar gooni ah oo arday kasta ah ayaa loo baahan yahay in la dhamaystiro.

KEENSO KAAR AQOONSI MARKA AAD SOO GALAYSID
Marka aad soo gashid, waxaa lagaa xaqiijninyaa in aad leedahay aqoonsiga iyo in aad mas'uul ka tahay ardayga. Kaarka waa lakala bixinayaa qaybta hoose waxaa lasiinayaa waalidka. Goobta laga soo galayo waaliidiinta waxaa la farayaa tagiga "goobta dib-u-mdeynta" waxaa jiri doona qof idiinka qaadayo qaarka qaybta hoose kaasi oo u geyni doono ardayga ama ardayda goobta ay joogaan. Waalidiinta waa in ay ogaadaan in mararka qaar lagu casumi karo gudaha dugsiga si loo weydiyo macluumaad dheeri ah.

WAREYSIYADA IYO KOONSALINKA/LATALINTA
Mararka qaar waalidiinta waxaa laga yaaba in lagu wargeliyo in ay qolada sharci fulinta ay baadhis u socota waxaana laga yaabaa in lagula taliyo in waraysiyadu ay lama huraan yihiin. Xaalado aad u daran awgeed, waalidiinta waxaa laga yaabaa in dhinac loo saaro maddama lafilayo xaalad degdeg ah oo caafimaad.